

Sharuucda Xaquuqda Waaridiinta

Haddii aad tahay waarid haysta cunug lixaad daran waxaad xaq uleedahay:

1. Inaad kaqaygasho kulamada Individualized Education Program “IEP”, oo ah Borogaramka Waxbarasho oo Qof Gaara Kuhaboon; kulankana aad baahida cunuggaaga uga hadasho;
2. Inaad haysato qof khuburo ah ama looyar kula joogo kulamada IEP-da, oo ah Borogaramka Baxbarasho oo Qof Gaara Kuhaboon;
3. Waxaad xaq uleedahay inaad hesho Koobi ama cadaynta lagu qiimeeyay cunuggaaga, inaad diido koobigan oo aad codsato qiimayn kale oo waxbarasho oo madax banaan, iyada oo dowladdu bixinayso qarashka;
4. Inaad latimaado warbixin qoraal ah oo aad meel kale kala timid, laguna daro marka qiimaynta cunuggaaga lasamaynayo;
5. Inaad baartid waxii kaydka waxbarasho ee khuseeya cunuggaaga iyo in lagusiiyo koobiga IEP-ka ama qoraalka Borogaramka Waxbarasho oo Qof Gaara Kuhaboon;
6. Inaad diido go'aanka ay gaareen kooxda dajisa Borogaramka Waxbarasho oo Qof Gaara Kuhaboon, oo aad ka dacwootid, sida: inaad cabasho kabuuxsatid Waaxda Waxbarashada Hoose iyo Sare, inaad marto nidaam dhex-dhexaad ah oo ay dowladdu bixinayso, in aad marto nidaam dhagaysi oo aan cidna lajirin iyo inaad codsatid nidaam go'aan maxkamadeed;
7. Waxaad xaq uleedahay inaad kaqayb qaadata dib uqiimaynta Borogaramka Waxbarasho oo Qof Gaara Kuhaboon – IEPs, iyo go'aan kasta oo waxkabadali kara IEP-ka, iyo inaad hesho digniin qoraal ah inta aan labadalal meelaynta waxbarashada cunuggaaga ama haddii shardi lagu xiro qaadashada waxbarasho kuhaboon oo bilaash ah;
8. In cuniggaaga lageeyo meel aan xanibaad lahayn iyo fasalka waxbarashada guud ee ugu haboon;
9. Waxaad xaq uleedahay inaad caawinaad luuqadeed bilaash ah heshid haddii English aanu ahayn midaad kufiican tahay;
10. Waxa cunuggaagu xaq uleedahay inuu helo waxbarasho guud oo bilaash ah oo leh borogaramka waxbarasho oo isaga sigaara ugu haboon, kaasoo loo diyaariyay si uu ukabo baahida cunuggaaga. Waxaa kujirikara, waxbarasho khaas ah iyo adeegyada laxariira sida aalado iyo adeegyo casri ah, qaaditaanka cunugga, adeegga caawinta hadalka cunugga, adeega dhinaca maqalka, adeega turjumaadda, adeega dhimirka (cudurada maskaxda) oo ay kujirto adeegyada kala talinta dhibaatooyinka maskaxda kudhaca iyo dhaqan celin, adeegyada kacaawinta soc-socodka, adeega caafimaadka ee iskuulka, neersis iskuulka ugu timaada, adeegyada Social Service ama adeegga bulshada, adeega latalinta iyo tababarka waaridka iyo adeegyo caafimaad oo go'aan lagu gaarayo marxalada qiimaynta.

Wasaarada Waxbarashada Dugsiyad Hoose iyo Saree ma samayso takoor ku salaysan jinsiyad, midab, asal ahaan halka aad ka timid, dhidig iyo lab inaad tahay, ama da'da mrkay timaado barnaamijyadeeda iyo howlaheedba. Waxii su'aalo ah oo laxariira barnaamijyada Waaxda iyo goobaha ay waxqabadyada iyo shaqooyinka Waaxdu kadhacayaan iyo waxii wax uqabad ah ee ufuran ayna isticmaalikaraan dadka lixaadka daran waxay kusoo hagaajin karaan dhismaha: Jefferson State Office Building, Civil Rights Compliance (U hogaansanka xaquuqda Shacabka)(Cinwaanka VI/Title IX/504/ADA/Age Act), Dabaqa 5aad, 205 Jefferson Street, Jefferson City, Missouri 65102-0480; telephone lambar 573-526-4757 or Relay Missouri (800) 735-2966.

Documentigani masiinayo xaquuq kabaxsan xaqa ama xaquuqda ay bixiyeen sharuucda Dowladda ama Gobolku waxaana loogu tala galay sababo wargalineed oo kaliya. Waxii wargalin ah oo dheeri ah, kala xariir Department of Elementary and Secondary Education (Waaxda Waxbarashada Hoose iyo Sare), Division of Special Education (Qaybta waxbarshad Gaarka ah)(573) 751-0699 ama webrepliespeco@dese.mo.gov

January 1, 2010